

# FAAFINTA RASMIGA

الرسمية



الجريدة

JAMHUIRIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

الجمهورية الصومالية الديمقراطية

Sannadka 11aad Muqdisho 29 Abr. 1983 1 r 4

FAAFAAHIN BIL SOO BAXA

درجه شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S. QIIMADU waa 5 Shilin lambar waliba—RUKUNKA: Sannadii waa Shs. 100 Somaliya gudaheeda—dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaa-bmaas 1 Janayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxaa ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanka waxaa a weydistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah—lacagta waraa lagu bixinayan Xafiiska Canshuuraha ee Wasaa-radda Lacagta.

KOOBNIIN

QAYBTA

KOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 13 Abr. 1983, U rogid Sharci, Xeer Sharci Lamb. 2 ee 18 Maarso 1983.

BOG. 210

SHARCI L. 5 ee 2 Abr. 1983, Sharci ku saa bsan dib u soo celinta Wakiilada Ganaacsiga Dibadda.

» 213

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 9 ee 6 Abr. 1983, Meel marin Heshiis dhe xmaray Dawladda Qadar iyo Dawlad da J. D. S. Kuna saabsan Shaqaalaha Soomaaliyeed ee ka shaqayndoona Balka Qadar.

» 218

QAYBTA / LABAAD  
X E E R

SHARCI Lambar 4 taariikh 13 Abr. 1983 U rogid Sharci  
Xeer Sharci Lambar 2 ee 18.3.83, Joojinta Qaadka.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaanshaha Guddiga  
Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeerka Sharci tirsigiisu  
yahay 2 ee soo baxay 18kii Maarso 1983, kuna saabsan  
Joojinta Qaadka, isagoo dib loo habeeyay, loona bedde  
lay sida ku tilmaaman qodobbada soo socda.

Qod. 2aad

Laga billaabo dhaqangalka Xeerka Sharci ee qodob  
ka sare ku tilmaaman, waxaa la mamnuucay in Qaad  
dibedda looga soo dejiyo Dalka J. D. Soomaaliya.

Qod. 3aad

Qof kasta ee Qaad Dalka J. D. S. Dibedda ka soo ge  
liya, soo qaada ama ka qayb qaata falalka noocaas ah,  
waxaa lagu ciqaabayaa.

Laba ilaa Shan Sanadood oo xabis ah iyo ganaax u  
dhexeeeya Sh. So. 10 000 ilaa Sh. So. 50.000.

Shan ilaa toban Sanadood oo xabsi ah iyo ganaax  
u dhexeeeya Sh. So. 50.000 ilaa Sh. So. 100.000, Haddii qof  
ku dembiga noocaas ah horey u galay.

Qaadka oo la gubo iyo Gaadiidka loo isticmaalay  
qaadiddiisa oo lala wareego, haddii ay caddaato in ula  
kac loogu soo qaaday.

Qod. 4aad

Beeraha Dalka gudhiisa ee Qaadku ku beeran ya  
hay, dadka lihi waa in ay ku baabi'yaan muddo hal Sano  
ku eg (31.3.84), kuna beddelaan beero cunno.

Haddii qofkaasi sidaasi veeli waayo. Qaadka was... 1-

Qod. 5aad

Laga billaabo dhaqangalka Sharcigan, ~~waa mam~~ nuuc in Qaad cusub Dalka gudihiiisa lagu ~~beero~~, qofkii beerana waxaa la saarayaa ganaax u dhixeeya Sh. So. 5.000 ilaa Sh. So. 25.000, iyo Qaadkii uu beeray ~~oo~~ la ~~baa~~ bi'yo.

Qod. 6aad

1. Waxaa reeban in qaad dibedda looga ~~soo~~ saare beerta uu ka baxo ee Dalka gudahiisa ah.

2. Qofkii ku xadgudba tilmaanta xubinta hore ~~ee~~ qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa xabsi u dhixeeya 3 ilaa 6 bilood iyo ganaax u dhixeeya Sh. So. 1.000 ilaa Sh. So. 3.000.

3. Haddii ujeeddada looga soo saaray ay tahay mid ganacsi, ciqaabtu waxay noqoneysaa 6 ilaa 12 bilood oo xabsi ah iyo ganaax u dhixeeya Sh. So. 5.000 ilaa Sh. So. 25.000.

4. Qofka beerta lihi ama ka masuulka ah ~~haddii~~ uu gacan ka geysto falalka kor ku tilmaaman, ~~ama~~ uu oggolaado in beerta dibedda loogala bax • Qaad, ciqaab ta waa loo laba laabayaa.

Qod. 7aad

Marka laga reebo xaalandaha ku tilmaaman ~~qodo~~. 2 iyo 6 ee Sharcigan, qof kasta oo lagu helo ~~qaad~~ Dal ka gudihiiisa ama dibeddiisa ka baxay, waxaa lagu ci qaabayaa xabsi u dhixeeya 6 ilaa 12 bilood, iyo ~~ganaax~~ u dhixeeya Sh. So. 5.000 ilaa Sh. So. 25.000.

Qod. 8aad

Qofka u xilsaaran ilaalinta iyo dhaqangelinta Sharcigan ee suura gal ka dhiga, ama fududeeyo, ama ku kaca fal ah in qaad Dalka la soo geliyo, lagu ~~beero~~, ku sii beernaado waqtigii loo qabtay kadib, laga ~~soo~~ saare halkii uu ku beernaa ama gudan waaya xilka ka saaran qabashada dadka haysta, wuxuu mutesanayaa ciqaab ~~to~~ ~~shigaa dembiisa~~ xilkii ka saarnaa uu gabay ~~oo~~ la

**Qod. 9aad**

Lacagta ka soo xeroota ganaaxyada ku tilmaaman Sharcigan, boqolkiiwa Sodon (30%) waxaa loo bixina yaa abaalgud, waxaana loo qaybinayaan sida ku tilmaaman Qod. 9—B ee Sharciga tirsigiisu yahay 30, soona baxay 13kii Noofember 1980.

**Qod. 10aad**

Qaadista dacwadaha la xiriira dembiyada Sharci gani dhigayo waxaa awood u leh Maxkamadda Badbaa dada Dalka.

**Qod. 11aad**

Wasaaradda Beeruhu waxay kaalmo u fidineysaa beeraleyda ku baabi'yo qaadka ubeeran inta ayan dha maan muddada halka Sano ah ee ku tilmaaman Qod. 4aad ee Sharcigan.

**Qod. 12aad**

Waxaa la buriyay Sharci ama Xeer kasta oo ka soo hor jeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

**Qod. 13aad**

Sharcigani dhaqangalkiisu wuxuu ka billaabana yaa 15ka Abriil 1983, waxaana lagu see saarayaa Faa finta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 13-4-1983.

**MADAXWEYNAHA J. D. S.**

(Maxamed Siyaad Barre)